Barnaamujka tallaalka ee iswidhishka

EE LOOGU TALO GALAY CARRUURTA QAARKOOD

Dhammaan carruurta deggan waddanka Iswidhan waxay xaq u leeyihiin in laga tallaalo sagaal cudurrada khatarta ah iyada oo la adeegsanayo daryeelka caafimaadka carruurta iyo dugsiyada (eeg warqadda warbixinta ee gaarka ah).

Weliba carruurta qaarkood ayaa lagu marti qaadaya tallaalka xanuunka beerka ee hepatit B, Tiibiida, hargebka iyo caabuqa loo yaqaan pneumokockinfektion.

XANUUNKA BEERKA KU DHACA EE HEPATIT B

Xanuunka beerka ku dhaca ee hepatit B, wuxuu ka mid yahay dhowr fayraska noolaha oo keena xanuunka ku dhaca beerka. Waxaana lagu kala qaada dhigga iyo dheecaannada ama dareerayaasha kale ee jidhka ku jira. Dadka qaarkood ayaan sideedaba cudurka lagu arag marka ay qaadaan, halka dadka qaarkoodna ay aad u xanuunsadaan bilooyin badan. Dadka intooda badani way caafimaadaan, laakiin dadka qaarkood ayaa fayrasku jidhkooda ku sii hadhaa muddo dheer ka dibna wuxuu keenaa in beerka ay ku dhacaan dhaawcyo ama cudurka kansarku. Khatarta ugu weyni waxa weeyi in qofku isaga oo aad u yar uu qaado xanuunka beerka ku dhaca ee hepatit B.

Waa kuwee carruurta ay tahay in la tallaalaa?

Tallaalka waxa lagula taliyaa dadka carruurta ka ag dhow sida waalidiintooda ama dadka kale ee qaba xanuunka beerka ku dhaca ee hepatit B ama carruurta waalidkoodu ay ka yimaaddeen waddan cudurka beerka ku dhaca ee hepatit uu Iswidhan kaga badan yahay.

Tallaalku muxuu ka hortagayaa, ama waa maxay bedbaadada uu keenayaa?

Tallaalku waa mid si aad ah wax ku ool u ah, sida badanka ahna dhammaan carruurta la tallaalay waxay noqdaan kuwo badbaadsan. Badbaadadaasi waa mid muddo dheer jirta- run ahaantii nolosha oo dhan.

Waa kuwee tallaalada laga tallaalo xanuunka beerka ku dhaca ee hepatit B?

Tallaalku wuxu jiraa isaga oo tallaal gaar ah. Tallaalista la tallaalayo carruurta muujada ah, waxa jira oo kale weliba tallaal la raaciyo, kaas oo uu ku jiro tallaalka cudurka beerka ku dhaca ee hepatit B.

Goorma ayaa tallaalka la bixiyaa oo carruurta la tallaalaa?

Tallaalka waxa la bixiyaa oo dadka la tallaalaa saddex jeer, waxa lala tallaalaa oo la raaciyaa tallaalada kale sannadka uu ilmuhuu muujada yahay gudihiisa (marka ilmuha da'diisu ay tahay 3, 5 iyo 12 bilood) ama waxa la raacaa oo lagu socdaa jedwel gaar ah.

Waa kuwee dhibaatooyinka yimaadda ama soo baxaa?

Carruurta intooda badan wax dhibaato ahi kuma timaaddo ama wac sidaas aan u weyneyn ayaa ka yimaadda tallaalka cudurka beerka ku dhaca ee hepatit B. Dhibaatooyinka yimaaddaa badanaa waxay caadi ahaan iskaga dhammaadaan muddo dhowr maalmood ah.

CAADI AHAAN (waxa lagu arkaa ugu yaraan 100kiiba 1 dadka la tallaalay):casaan, barar iyo damqasho meeshii qofka laga mudey.

WAXAAN AAN CAADI AHAYN AMA WAXYAABO MAR-MAR IYO DHIF AH: xummad, cuncun, madax xanuun, matag, shubag, finan jidhka ah, fal xasaasiyad ah (jidhka oo wax diida)

TIIBIIDA AMA QAAXADA

Tiibiida ama qaaxadu waa cudur ay keento bakteeriyo. Badanaa bakteeriyadaasi waxay weerartaa sombobada, xitaa waxa kale oo weliba ay weerartaa xubnaha kale. Cudurka Tiibiida waxa laysku qaadsiiyaa oo uu ku fidaa caadi ahaan haweda iyo qufaca. Cudurkaasi dadka intooda badan wuxuu ku reebaa qufac muddo dheer ku raaga, misaanka qofka oo hoos u dhaca iyo xummad. Cudurku waxa kale oo weliba uu noqon karaa mid jidka ku qarsoon muddo sannaddo badan, dabadeedna kolka dambe qofka ku soo baxa oo ku qarxa. Tiibiida ama qaaxada nooceeda jidhka ku kaydsan ama ku dahsooni maaha mid la kala qaado.

Waa kuwee carruurta ay tahay in la tallaalaa?

Tallaalka waxa lagula taliyaa carruurta caafimaadka qabta ee agtooda ay joogaan waalidiin ama dadka kale ee qaba cududurka tiibiida ama carruurta waalidkoodu ay ka yimaaddeen ay ka yomaaddeen waddan cudurka tiibiida ama qaaxadu ay Iswidhan kaga badan tahay.

Tallaalku muxuu ka hortagayaa ama waa maxay bedbaadada uu keenayaa?

Tallaalku wuxu badbaado fiican siiyaa carruurta yar-yar ee qaba noocyada ba'an ee tiibiida ama qaaxada .Ka hortagga ama badbaadada da'da muddeda dheer waa laga wada hadlay aadna way u kala duwen tahay.

Waa kuwee tallaalada laga tallaalo cudurka tibiida ama qaaxadu?

Tallaalku wuxu jiraa isaga oo tallaal gaar ah.

Goorma ayaa tallaalka la bixiyaa oo carruurta la tallaalaa?

Tallaalka caadi ahaan waxa loo bixiyaa in ama doos mar la qaato, laga bilaabo marka ilmuhu uu lix jir yahay, laakiin ka hor waa in la tallaalaa marka ay jirto khatar weyn oo is-qaadsiin ahi.

Maxa dhaca tallaalka ka dib?

Tallaalka micnahiisu waxa weeyi, meel yar oo jidhka ka mid ah ayaa la bukeysiinayaa. Laba ilaa afar toddobaad ka dib marka ilmaha la tallaalo ayaa meeshii la talaalay noqotaa buro yar oo adag. Meeshaa adkaatay way casaataa baaxaddeeduna way weynaataa, muddo ka dibna waxay noqotaa nabar meesha ku samaysama. Nabarka sidiisa ayaa layskaga deynayaa, isaga ayaana iskii isku daweynaya dhowr toddobaad ka dib. Iska ilaali biyaha lagu dabbaasho inta nabarku uu furan yahay. Carruurta qaarkeed marnaba nabar kuma dhigmo ee meesha ayuumbaa yara adkaata, taas oo dhowr bilood ka dib iska baaba'da.

Waa kuwee dhibaatooyinka yimaadda ama soo baxaa?

WAXAAN CAADI AHAYN AMA WAXYAABO MAR-MAR IYO DHIF AH: Nabar weyn oo aan caadi ahayn oo muddo dheer qaata in uu ku bogsado, xummad, madax xanuun, fal xasaasiyad ah (jidhka oo wax diida).

HARGEBKA AMA DURIGA

Hargebaka ama durigu waa caabuq ama cudur ku dhaca dhuumaha hawo mareenka, waxaana keena noolaha fayraska. Caadi ahaan wuxu ku fidaa haweda marka qofka bukaa uu qufaco ama uu iska siimiyo. Jiilaal kasta waddankayaga hargeb ama duri ayaa ku dhaca, waxaana u bukoota boqolkiiba laba ilaa shan inta u dhaxaysa. Hargebku badanaa iskii ayuu iskaga tagaa, laakiin caadi ahaan waxa ula socda xanuun sombobada ku dhaca.

Waa kuwee carruurta ama dadka ay tahay in la tallaalaa?

Marka laga yimaaddo dadka da'doodu ay ka weyn tahay 65 sano, ayaa waxa tallaalka lagula talinayaa dadka waaweyn iyo carruurta qaba cudur ba'an oo ah wadne xanuun ama sombob xanuun, macaan ama sonkorow aan degganayn ama qofka oo uu si aad ah hoos ugu dhacay daafaca jidhka ee cudurradu. Xitaa carruuraha kale ee qaba cudurrada kale waa laga hadli karaa ama arrinta waa lagu dari karaa. Qiimaynta waxa samayn kara dhakhtarka ilmaha.

Tallaalku muxuu ka hortagayaa, ama waa maxay bedbaadada uu keenayaa?

Maaddaama fayraska keena hargebku uu had iyo jeer baddalo hannaanka ama isku taggiisa, waa in xilli kastaba la soo saaraa tallaal cusub oo wax ka tara fayrsaka markaa jira. Kolkaas oo ay tahay in qofku uu is tallaalo sannad walba si uu u helo badbaadada ama ka hortagga ugu suurtagalkasan.

Waa kuwee tallaalada laga tallaalo hargebka ama durigu?

Waxa jira tallaallo fara badan oo kala duwen oo hargebka ama duriga laga tallaalo.

Goorma ayaa tallaalka la bixiyaa oo carruurta la tallaalaa?

Carruurta waxa la tallaali karaa laga bilaabo marka da'doodu ay tahay 6 bilood. Tallaalka waxa loo bixin karaa hal doos ama laba doos, taas oo ku xidhan kolba da'da ilmaha.

Waa kuwee dhibaatooyinka yimaadda ama soo baxaa?

Tallaalada hargebka ama duriga waxa laga sameeyaa fayras lagu beero ama lagu kobciyo ugaxda digaagga dheddig. Haddaba sidaas awadeed qofka isagu asaasiyad ba'an ku leh ukunta waa in aan la tallaalin.

Carruurta intooda badan wax dhibaato ah kagama timaddo tallaalka ama wax aan sidaas u sii buurneyn ayaa ka soo gaadha tallaallada. Dhibaatooyinka markaas jiraa caadi ahaan waxay ku baaba'aan dhowr maalmood gudahood.

CAADI AHAAN (waxa lagu arkaa ugu yaraan 100kiiba 1 dadka la tallaalay):casaan, barar iyo damqasho meeshii qofka laga mudey, xummad.

WAXAAN CAADI AHAYN AMA WAXYAABO MAR-MAR IYO DHIF AH: fal xasaasiyad ah (jidhka oo wax diida)

BAKTEERIYADA PNEUMOKOCKER

Pneumokocker waa bakteeriyo keeni karta cudurro yar oo ku dhaca dhegaha iyo caabuq ku dhaca sanqaroorka, laakiin waxa kale oo ay keeni karaan cudurro halis ah oo nolosha qofka khatar gelin kara, kuwaas oo dhiigga sumayn kara maskaxdana cudur ku keeni kara. Xitaa waxa kale oo jira khatar ah, tusaale ahaa: noocyo kala duwen oo ah dhaawac xagga maskxda ah

Waa kuwee carruurta ay tahay in la tallaalaa?

Tallaalka guud ee ilmaha muujada ah ee laga hortagayo pneumokocker waxa la sameeyey 1dii bisha jeenaweri 2009. Weli haddaa carruurta aan la tallaalin ee khatarta ugu jirta in si ba'an ay u ugu bukoodaan cudurka pneumokocker, waxa lagula talinayaa tallaal, iyada oo aan loo eegin da'da ay yihiin. Tassina tusaale ahaan waxay khusaysaa. Ilmaha sida ba'an uga buka wdnaha, sombobada ama kelyaha, ama ku dhashay cudurka yaraanta

dheecaanka (immun) ee (immunbristsjukdom) ama carruurta dhegta ku leh (cochleaimplantat). Qiimaynta waxa samaynaya dhakhtarka ilmaha.

Tallaalku muxuu ka hortagayaa, ama waa maxay bedbaadada uu keenayaa?

Tallaalladu waxay si wanaagsan uga hortagaan noocyada pneumokocktyper ee ku jira tallaalka.

Waa kuwee tallaalada laga tallaalo cudurka ama bakteeriyada pneumokocker?

Seyladda ama suuqa waxa yaal oo lga helayaa laba tallaal oo kala nooc ah. Mid loogu talo galay carruurta da'doodu ka hoosayso 5 sano iyo mid loogu talo galay carruurta da'doodu ka weyn tahay 2 sano iyo dadka waaweyn.

Goorma ayaa tallaalka la bixiyaa oo carruurta la tallaalaa?

Tallaalka loogu talo galay kooxda carruurta ee khatarta ku jirta, kuwaas waxa la sameeyaa iyada oo la tix raacayo jedwel gaar ah.

Waa kuwee dhibaatooyinka yimaadda ama soo baxaa?

Carruurta intooda badan wax dhibaato ahi kuma timaaddo ama wac sidaas aan u weyneyn ayaa ka yimaadda tallaalka cudurka pneumokocker. Dhibaatooyinka yimaaddaa badanaa waxay caadi ahaan iskaga dhammaadaan muddo dhowr maalmood ah.

CAADI AHAAN (waxa lagu arkaa ugu yaraan 100kiiba 1 dadka la tallaalay): casaan, barar iyo damqasho meeshii qofka laga mudey, xummad, shuban, matag.

WAXAAN CAADI AHAYN AMA WAXYAABO MAR-MAR IYO DHIF AH: jidhka qofka oo si kedis oo xad dhaaf ah dareen dheeraad u yeesha oo wax u diida, cuncun, xummad, finan yuruuruc ah, kala daadsanaan.

MUHIIM

Tallaalka ka hor – Uga warran haddii ilmahaagu u xasaasiyad ku yeeshay ama si aan caadi ahayn uu jidhkiisu u diidey tallaaladii hore.

Tallaalka ka dib – La xidhiidh rugta daryeelka caafimaadka ee carruurta ama daryeelka caafimaadka dugsiyada haddii ilmahaaga aad ku aragto wax aan caadi ahayn xilliyadii ugu dambeeyey.

Miyaad dooneysaa warbixin dheeraad ah?

Waxaad marka hore la xidhiidhaa dhakhtarka ilmaha. Xitaa waxaad la xidhiidhi kartaa rugta daryeelka caafimaadka ama daryeelka caafimaadka ee dugsiga.

Socialstyrelsen
MARS 2009 ART. NR. 2009-126-67